

# Waxay dawladdu billaabaysaa heerkii koowaad ee qorshihii dalka dib loogu furayay

Kaddib markii ay Agaasinka caafimaadka iyo FHI sidaas ku taliyeen ayay dawladdu fulinaysaa heerkii koowaad ee qorshaha dib-u-furidda dalka laga billaabo saqda dhexe ee habeenka jimcaha 16-ka abriil. Waxaa iyana xoogaa la debcinayaan qabanqaaboooyinka carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano iyo ciyaaraha heerka sare. Degmooyinka uu cudurku ku badan yahay waa in ay ka fikiraan in ay jimcaha ka hor deegaannadooda tillaaboooyin ku soo rogaan.

Heerka koowaad ee qorshaha dib-u-furidda ee dawladda waxaa dib looga noqonayaa tillaaboooyinkii heerka qaran ee booskaha ka hor la soo rogay.

- Dadka oo taxaddar muujiyay awgeed ayaan wadajir gacan uga geysannay in aysan kala qaadista cudurku kordhin booskaha, taas oo suurtagelisay in aan jimcahaanba billaabi karno heerkii koowaad ee qorshaha dib-u-furidda, ayay tiri ra'iisal wasaare Erna Solberg.

Debcinta tillaaboooyinka heerka qaran ma saamayn doonaan aagagga Østlandet ee ay dawladdu ku soo rogtay tillaaboooyinka heerka gobol, ama degmooyinka lagu soo rogay xeer-hoosaadyada adag ee heer deegaan sida Oslo iyo Steinkjer.

- In kasta oo laga billaabo jimcaha xoogaa la yara debcinayo tillaaboooyinkii heerka qaran, laakiin weli way adag yihii. Waxaa tusaale ahaan iibinta qamrigu istaagayaa marka ay saacaddu tahay 22.00 ayadoo lagu xiray in cunto lala iibsado, islamarkaana waxa lagu talinayaa in dib loo dhigo ama la baajiyo qabanqaaboooyinka ay imaanayaan dad ka kala imaanaya degmooyin badan, ayay tiri Solberg.

Degmooyinka waxaa dhammaantood looga baahan yahay in ay weli lahaadaan heegan wanaagsan, xataa kuwooda uu cudurku ku yar yahay. Degmooyinka iyo

aagagga uu cudurku ku badan yahay waa in ay ka fikiraan in ay deegaankooda ku soo rogaan tillaabooyin adag oo looga hortagayo kala qaadista cudurka, kuwaas oo ku salaysan xaaladda kala qaadista cudurka ee halkaas ka jirta. Dhakhtarka degmada ayaa haddii loo baahdo wuxuu gaari karaa go'aan degdeg ah oo uu tillaabooyin ku soo rogayo inta la sugayo in ay siyaasiyiinta degmadu arrinta ka fadhiistaan.

Si degmooyinka loo siiyo wakhti ay ku qiimeeyaan tillaabooyin adag oo iyaga u gaar ah, ayay is-beddellada heerka qaran dhaqangeli doonaan saqda dhexe ee habeenka jimcaha ee 16-ka abriil.

### **Go'aammo deegaan oo laga gaarayo heerarka tillaabooyinka ee iskoollada iyo xannaanooyinka carruuraha**

Xaaladda kala qaadista cudurku meel ba waa si, qaybaha kala duwan ee dalkuna aad ayay u kala duwan yihii. Waxay sidaas darteed dawladdu qabtaa in ay deegaannadu weli ayagu go'aansadaan heerarka tillaabooyinka iskoollada iyo kuwa xannaanooyinka carruuraha.

- Xiritaanka xannaanooyinka carruuraha iyo iskoollada waa in la yareeyaa ilaa inta la yarayn karo. Laakiin waxay degmooyinku qiimayn karaan in waxbarashada iskoollada laga dhigo mid gebi ahaanba dhigitaal ah oo guryaha wax lagu baranayo ama in ay muddo gaaban xiraan xannaanooyinka carruuraha - ayadoo ujeeddadu tahay in xaaladda jirta la ogaado oo la helo fursad dadka tijaabo looga qaado. Taas oo ah fursad ayaduna jirta haddii ay dad badan karantiil ku jiraan, ayay tiri Guri Melby oo ah wasiirka waxbarashada- iyo is-dhexgalka.

### **Qabanqaabooyinka isboortiga- iyo dhaqanka ee carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano**

- Is-beddello ayaan hadda samaynay keenaya in qabanqaabooyinka isboortiga- iyo dhaqanka ee carruurta iyo dhallinyarada ay ka qaybqaadan karaan ilaa 50 qof. Is-beddelkaan ayaa ah war u fiican carruur iyo dhallinyaro aad u badan kuwaas oo wakhtiga ay firaaqada yihii ka qaybqaata firfircooni aan isboorti ahayn tusaale ahaan sida kooxaha heesaha ama tiyaatarrada. Laakiin waa in ay ka-qaybqaataayaashu ahaadaan kuwo isku degmo ah, ayuu yiri Kjell Ingolf

Ropstad oo ah wasiirka qoyska- iyo carruurta.

Waxaa qabanqaabooyinkaan isugu imaan kara ilaa iyo 50 qof, ayadoo aysan daawadayaashu fadhiyin goobo joogto ah oo loo tilmaamay. Xaddidaaddii guud ee tirada dadka ayaa la raacayaa marka ay daawadayaashu ku fadhiyaan kuraas joogto ah oo loo tilmaamay.

### **Qabanqaabooyinka isboortiga- iyo dhaqanka ee dadka waaweyn**

Kaddib markii ay Agaasinka caafimaadka iyo FHI sidaas ku taliyeen ayaa loo fasaxayaa labada heer ee ugu sarreeya horyaallada kubbadda cagta ee ragga iyo dumarka in ay ciyaaraha tababbarka ah dibedda ku ciyaari karaan. Ciyaaraha tababbarka ah waxaa la qabanayaa ayada oo inta ugu gaaban ee suurtaggalka ah la safrayo, islamarkaana loo baahan yahay in la raaco nidaamka ka hortagga kala qaadista cudurka ee Xiriirka kubbadda cagta ee Norway.

Waxaa sidoo kale ciyaaro tababbar ah loo fasaxayaa labada heer ee ugu sarreeya horyaallada kubbadda cagta ee ragga iyo dumarka ee degmooyinka ay ka jiraan tillaaboojin heer gobol ah oo waafaqsan tillaabooyiinka heerka A iyo B.

Ciyaaraha ka dhacaya degmooyinkan waxaa la oggol yahay in ay goobjoog ahaadaan keliya ciyaartoyda, kaaliyayaasha kooxaha iyo garsoorayaasha.

Ayada oo lagu salayn doono khibradda laga helo ciyaaraha tababbarka ah iyo qiimayn cusub oo lagu sameeyo xaaladda kala qaadista cudurka ayay dawladdu toddobaadka 18-aad go'aan kama dampays ah ka gaari doontaa in ciyaaraha horyaallada loo oggolaado labada heer ee ugu sarreeya horyaallada kubbadda cagta ee ragga iyo dumarka. Degmooyinka ay ka jiraan tillaabooyinka heerka gobol ee waafaqsan tillaabooyinka heerka A waxaa ciyaartoyda xirfadlayaasha ah loo fasixi doonaa tababbar abaabulan. Arrintan ayaa hadda si toos ah u dhaqangelaysa.

### **Waxaa lagu talinayaa in aan loo bixin safarrada waddanka gudihiisa ah**

Norway dadka uu cudurku ku dhacay waxay u badan yihiin Oslo iyo Viken. Taas oo sheegaysa in weli loo baahan yahay in ay jiraan tillaaboojin heer qaran ah si loo yareeyo khatarta loogu jiro in cudurka la gaarsiyo meelaha uu ku yar yahay ama aan cudurku ka jirin.

- Weli waxaa dadka lagula talinayaa in layska dhaafo safarrada waddanka gudihiisa ah. Weliba kuwa lagu tegayo ama looga baxayo aagagga uu cudurku ku badan yahay, ayuu yiri Kjell Ingolf Ropstad oo ah wasiirka qoyska- iyo carruurta.

### **Ramadaan iyo xuska ciidda**

- Maanta waxa bilaabmay Ramadaan. Waa xilli-cibaadeed muhiim u ah dad badan oo jooga Norway oo keena in dadku isugu yimaado cibaado, afur iyo xuska ciidda.

Waxa aan taas darteed rabaa in aan dadka xasuusiyo in isu-imaanshooyinka dadku ay kor u qaadayaan khatarta faafitaanka cudurka iyo in loo baahan yahay in qof kasta yareeyo tirada dadka ee uu la joogayo. Waa wax aan ogahay in ay dhammaan bulsho-diimeedyada waddanku xil iska saarayaan. Waxa kale oo aan idin xasuusinayaa in isugu imaanshaha masaajidka loo arkayo qabanqaabo, oo ay ka qaybgeli karaan keliya dad tiro kooban. Laakiin waxa jiri kara tallaabooyin maxalli ah oo intaas ka sii adag, markaa waa in qof kasta ogaado xeerarka iyo taloooyinka ka jira meesha uu deggan yahay. Xataa marka la booqanayo guryaha dadka. Waxannu rabnaa in qof kasta helo Ramadaan wacan oo ammaan ah, ayuu yidhi Ropstad.

Xilliga Ramadaanta ma la rabo in muslimiinta sooman ay wax cunaan ama cabaan marka qorraxdu ay soo jeedo. Sannadkan masaajiddo iyo ururro badan oo jooga Norway ayaa la weydiiyey in la qaadan karo tallaalka koroonada marka la soomman yahay. Shabakadda Is-fahamka ee Muslimiinta iyo Golaha Islaamka Norway waxa ay sheegeen in tallaalka la qaadan karo marka la soomman yahay oo aan soonku ku burayn.

### **U gudubka heer 2**

Waa xogta la helo, oo maaha taariikho, waxa lagu salaynayo go'aanka u gudubka heer kale. Caadi ahaan ku dhawaad 3 toddobaad ayaa u dhaxaynaya heerarka.

- Qiimayn guud oo ku salaysan saddex arrimood oo la eegayo ayaa sheegi doonta xilliga aynu u gudbi karno heerka 2-aad ee qorshaha dib u furidda: xaaladda faafitaanka iyo culayska ka imanaya cudurka, awooda adeegyada caafimaadka iyo halka uu barnaamijka tallaalku marayo. Waxannu bisha May

gudaheeda eegi doonaa in xaaladdu tahay mid oggol in loo gudbo heerka 2-aad ee qorshaha dib u furidda.

Waxannu Norway u furi doonaa si tallaabo-tallaabo ah oo nidaamsan, ayey tidhi raysalwasaare Erna Solberg.

## **Waa kuwan tallaabooyinka heerka qaran ah ee jira laga bilaabo**

### **16. Abriil:**

#### **Talooyin khuseeya waddanka oo dhan**

Kala fogaada masaafo 1 mitir ah. Gacmaha nadiifi. Guriga joog haddii aad xanuunsanayso.

#### **Is-dhexgalka dadka**

- Wuxuu wasan in qof kasta yareeyo la joogga dadka kale.
- Wuxuu dadka lagu dhiirigelinaya in dibedda lagu kulmo, iyo in aan la yeelan marti ka badan shan qof. Haddii martida oo dhan ka wada timi hal guri waxa la noqon kara dad intaas ka badan, laakiin waa in la kala fogaan karo (cusub).
- Caruurta xannaanooyinka iyo dugsiyada hoose waxa ay is booqan karaan caruurta ka tirsan kooxdooda joogtada ah. Carruurtu iyo dhallinyaradu, marka laga tago is booqashada caruurta ay ka wada tirsan yihiin koox joogto ah, waxa ay is booqan karaan hal ama labo saaxiib oo joogto ah.

#### **Safarrada**

- Wuxuu lagu talinaya in la iska dhaafo safarrada dibedda. Waa la samayn karaa safarrada aad u ah lagama maarmaan.
- Iska dhaaf safarrada lagama maarmaanka ahayn ee waddanka gudahiisa ah. Weliba kuwa lagu tago ama lagaga baxayo aagagga faafitaanka cudurku ku badan yahay.
- Waa la aadi karaa guri-fasaxeed (la leeyahay ama la kiraystay) ama hoteel ku yaalla waddanka, laakiin iska dhaaf gaadiidka dadweynaha haddii aad awoodo.

- Safarrada lagu tegayo shaqo iyo goob waxbarasho sare waxa loo arkaa safar lagama maarmaan ah.
- Dadka safar ku aada degmooyin ay tallaaboooyinkoodu ka debecsan yihiin degmadooda waxa wacan in ay caadi ahaan ku dhaqmaan taloooyinka ka jira degmada ay deggan yihiin.

### **Iskuullada iyo xannaanooyinka carruurta**

- Xannaanooyinka iyo iskuulladu waxa ay ku jiraan heerka huruudda ee ka mid ah habka midabyada nalka taraafikada.

### **Shaqooyinka**

- Guriga ha ku shaqeeyaan dhammaan dadka awooda.

### **Ganacsiga/dukaammada**

- Waa ay furan yihiin iyadoo lagu dhaqmayo ka hortagga cudurka oo waafaqsan nidaam u gaar ah nooca ganacsiga/meheradda

### **Ciyaaraha iyo firfircoonda waqtiga firaaqada ah**

- Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sanno si caadi ah ayey uga qaybgeli karaan tababbar iyo firfircoonda waqtiga firaaqada ah. Waxa iyaga laga dhaafay talada ku saabsan in la kala fogaado hal mitir marka ay lagama maarmaan u tahay firfircoonda la samaynayo.
- Haddii carruur iyo dhallinyaro la tababbarato koox, urur ama wax la mid ah oo ka tirsan degmo kale, waa loo oggol yahay in ay tartannada kala qaybgalaan koox-ciyaareedkaas/ururkaas haddii xaaladda faafitaanka cudurku saamaxayso. (Cusub)
- Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sanno ee sameeya firfircooni aan la isu dhawaanaynin, sida shiiga, waxa ay ka qaybgeli karaan qabanqaabooyin dibedda ah oo isu keenaya ka qaybgalayaal isku hal degmo-ciyaareed ama gobol-ciyaareed ah marka kala qaybinta juqraafiyadeed lagu saleeyo gobol-gobol

- Dadka waaweyn waxa ay samayn karaan firfircooni abaabulan oo gudaha ah marka ay yihii ugu badnaan 10 qof, islamarkaana ay kala fogaan karaan masaafu ah ugu yaraan hal mitir. (Cusub)
- Dibeddana dadka waaweyn waxa ay samayn karaan firfircooni abaabulan, haddii ay kala fogaan karaan masaafu ah ugu yaraan hal mitir. (Cusub)
- Ciyaartoyda ciyaaraha heerarka sare waxa ay hadda u tababbaran karaan si caadi ah, gudaha iyo dibeddaba.

## **Waxbarashada sare**

- Waa la joogi karaa goobta waxbarashada haddii la xoojiyo tallaabooyinka ka hortagga cudurka. Waa la isticmaali karaa qolalka akhriska iyo maktabadda. Waxa wacan in la iska dhaafo cashar-bixinnada iyo kulannada waaweyn, laakiin waa la samayn karaa cashar-bixin la siinayo arday kooban. (Cusub)

## **Xeerar khuseeya waddanka oo dhan**

### **Isu-imaanshooyiinka iyo qabanqaabooyinka gaarka ah:**

- Waxa wacan in dib loo dhigo ama la baajiyoo dhammaan qabanqaabooyinka isu keenaya dad ka tirsan degmooyin kala duwan.

Xeerarka khuseeya qabanqaabooyinku waa kuwan:

- Ugu badnaan toban qof ayaa joogi kara isu-imaansho gaar ah oo lagu qabanayo meel gudaha ah oo aan ahayn guriga, tusaale ahaan xafad dhalasho oo meel loo kiraystay. Ugu badnaan 20 qof marka dibedda lagu qabanayo. Carruurta xannaanooyinka ama dugsiyada hoose ee ka wada tirsan hal koox oo joogto ah, waa ay kulmi karaan haddii dad waaweyn oo tiradoodu tahay inta lagama maarmaanka ah ay u fududays.
- Ugu badnaan 10 qof ayaa joogi kara qabanqaabo lagu qabanayo gudaha oo aan lahayn boosas la fadhiisto oo joogto ah oo loo tilmaamayo qofka, laakiin ilaa 50 qof ayaa ka qaybgeli karaa qabanqaabo ciyaareed ama dhaqameed oo isu keenaysa ka qaybgalayaal ka yar 20 sanno oo ka wada

tirsan hal degmo (waxa cusub in 50 joogi karaan qabanqaabo dhaqameed).

- Ugu badnaan 100 qof ayaa joogi kara qabanqaabo lagu qabanayo gudaha oo leh boosas la fadhiisto oo joogto ah loona tilmaamayo qofka (cusub)
- Ugu badnaan 200 qof ayaa joogi kara qabanqaabo lagu qabanayo dibedda, laakiin waxa la oggol yahay 600 qof (oo u kala qaybsan 3 kooxood oo joogto ah oo mid kasta yahay ugu badnaan 200 qof) haddii ay fadhiyaan boosas joogto ah oo loo tilmaamay isla markaana labo mitir u dhexeeyaan kooxaha (cusub).
- Masuulka qabanqaabada waxa laga rabaa in uu qaado tallaabooyin lagu hubinayo in ka qaybgaleyaasha aan isku guriga ahayni kala fogaadeen intii laga rabay marka dadku fadhiyaan boosas joogto ah oo loo tilmaamay. Haddii laga maarmi waayo waa in la isticmaalo ilaalo si loo hubiyo arrintaas.
- Si la mid ah habka goobaha cuntada/cabitaanka ayaa qabanqaabooyinkana loogu iibin karaa khamri (cusub).

### **Goobaha cawayska, makhaayadaha iyo qabanqaabooyinka haysta shatiga khamri-iibinta**

- Waxa khamriga laga iibin karaa keliya dadka unto dalbada. Gadista khamriga waxa la joojinaya saacada 22.00 (cusub).
- Waxa la rabaa in la diiwaangeliyo macluumaadka xidhiidhka ee martida, marka martidu oggolaato.